# Tilmaamaha Beerista

## Sideen ayaan ugu waraabiyaa beertayda biyaha roobka?

Ujeedada hagahani waa inuu kaa caawiyo ilaalinta quruxda, caafimaadka iyo waxqabadka waraabinta beertaada ee biyaha roobka.

Hagahan waxa ku jira tallooyinka beerista guud, tallooyinka daryeelka xilliyeed, dhirta lagu taliyay, iyo haramaha caadiga ah. Daryeelka saxda ah, beertaadu waxay sii wadi doontaa inay caawiso harooyinkayada iyo webiga Mississippi nadiifintiisa iyadoo la qabsanayo qulqulka biyaha iyo ka saarida wasakhda.

| Su'aalo? | HADDAY HAA tahay, samee hawlahan lagu talliyey |
|---|---|
| **Daad ma jiraa in ka badan laba maalmood (48 saacadood) ka dib roobabka da'ay?** | Waraabinta biyaha roobku maaha mid shaqaynaysa oo waxay u baahan tahay caawin. Fadlan kala xidhiidh CRWD (telefoonka iyo wabsaaytka hoose). |
| **Ma jiraan wax xannibaya qulqulka biyaha ee beerta soo galaya?** | Ka saar wasakhda, haramaha iyo qashinka kale ee meesha laga soo galo kasoo galaya si joogto ah iyo roob kasta ka dib. Ku rid ciidda iyo wasakhda waddada taala goobta qashinka. |
| **Wasakh, caleemo, xashiish ama qashin kale miyaa lagu ururiyay beerta?** | Saar oo tuur qashinka dheeraadka ah iyo xashiishka kale. Ku rid ciidda iyo wasakhda waddada taala goobta qashinka. Waxaad gubi kartaa caleemaha iyo jiridaha. |
| **Majiraa nabaad guur ama ciid qaawan oo beerta laga heli karo?** | Dooro oo ku dar dhir ku salaysan qorraxdaada, hadhkaaga iyo xaaladaha qoyaanka ciidda. U gudbi - Blue Thumb's Plant Finder wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xaaladaha beeritaanka: blue-thumb.org/plants. Ku dar lakab saddex-inch ah oo ah ciid la kuusay ah alwaax adag oo ciid lagu wareejiyay si aad uga hortagto haramaha ama nabaad-guurka. |
| **Dhirtu ma u baahan tahay biyo badan?** | Ka dib markii la beero, waraabi maalin kasta muddo hal toddobaad ah ilaa uu roob da'o maalintaas. Inta lagu jiro xilliga koritaanka ugu horreeya, ku waraabi si toddobaadle hal inch oo biyo ah. |
| **Miyay haramo jiraan?** | Haramaha xididada u saar. Tixraac sawirada gudaha ee haramaha caanka ah. Ka booqo "Tani ma geed haramo ah baa?" apps.extension.umn.edu/garden/diagnose/weed |



Scan for more information
Escanea el código para más información
Yog xav paub ntxiv mus yees lub cim
Lambarka halkan mari si aad u aragto faahfaahin
ဖးဒိ (စကဲၣ်) အီၤဒ်သိးကဒိးန့ၣ်တၢ်ကစီၣ်ဂ့ၢ်ကျိၤအါထီၣ်အဂၢ်တက့ၢ်

Capitol Region Watershed District | 595 Aldine Street, Saint Paul, MN 55104 | Tel. (651) 644-8888 | capitolregionwd.org

# Daryeelka Xililaha ah ee Beerta

## GU'GA

- Ka saar dhirta dhimatay, iniinyaha, cawska iyo wax kasta oo qudhmay.
- Dhuuban ama jirid jarida dhirta isku cufan/dhirta aadka u badan.
- Ka saar godadka ay waxkasoo galayaan ama tuubooyinka wax kasta oo ka hor istaaga jiilaalka.



- Kudar, rar, ama kalaqaybi dhirta haddii ay isku bataan ama u muuqda goob dhirtu wada dabooshay.
- Haramaha kagur dhammaadka bisha May, kahor Maalinta Xuska ama marka u horaysa ee geedaha dandelions noqdaan jaale.

## XAGAAGA

- Goynta dhirta qudhuntay, aan soo jiidasho lahayn, ama aan ahayn qaar dhaadheer.



- Hubi nabaad guurka, daadka ama fatahaada kadib duufaanada waawayn.
- Ka saar haramaha xilliga kuleylaha 4 Julaay iyo haramaha xagaaga dambe ee badhtamaha Agoosto.



## DAYRTA

- Ka saar ama baddal dhirta, gaar ahaan kuwa liita.
- Ka nadiifi caleemaha dhirta kasoo daata ama meelaha biyuhu kasoo gali karaan.



- Kasaar geed gaabka iyo jiridaha dhirta marka aanay baxayn kadib xiliga qaboobaha.
- Haddii la doono, caleemaha dhirta dhaladka ah ee jiilaalka loo isticmaalo cunto ahaan ee lasiiyo xayawaanka.



## JIILAALKA

- Badal carada aad ku wareejisay jiilaalka horaantiisa markaasoo loo baahan yahay.



- Kasaar xashiishka iyo qashinka kale.



- Ka fogee meelaha barafku ku urursan yahay ama kiimikooyinka sida milixda beerta.
- Diyaari qalabka waraabinta ee xilliga jiilaalka!



# CRWD Waxay ku Talinaysaa Kuwa Dhaladka ah ee Mudada La Beerayay


Cardinal Flower


Sensitive Fern


Pink Turtlehead


Prairie Blazing Star


Little Bluestem


Swamp Milkweed


Blue Flag Iris


Dwarf Bush Honeysuckle


Butterfly Weed


Fox Sedge


Purple Dome Aster


Prairie Dropseed



Black-Eyed Susan



Wild Columbine



Jacob's Ladder



Wild Geranium

U gudbi Dhirta Blue Thumb's Plant Finder wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xaaladaha beeritaanka: blue-thumb.org/plants/

# Haramaha Beerta Guud ee La Waraabinayo Xilli Roobaadka



Dandelion



Crabgrass



Reed Canary Grass



Creeping Charlie



Plantain



Thistle



Prickly Lettuce



Clover

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan haramaha, booqo "Dhirtani ma haramaa?" si onlaayn ah adoo uga baadhaya apps.extension.umn.edu/garden/diagnose/weed/